Waa Nuqul Dawli ah – lama iibin karo


| JAMHUURIYADDA | | SOMALILAND |
|---|---|---|

# FAAFINTA RASMIGA AH

| SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE | ألنَّشرة الرَّسمية لجمهورية صوماليلاند |
|---|---|

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA,
MADAXTOOYADDA JSL, HARGEYSA,
*E-mail: Garyaqaankaguud@gmail.com*

| Sanadka: 1aad | Cadadka: 9aad ee September | Taariikh: 06/10/2012 |
|---|---|---|

QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.
RUKUNKA (Subscription):

*QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii kastaba SL. Sh.*


**TUSMADA CADADKA**


| | Bogga |
|---|---|
| ***QAYBTA KOWAAD*: XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA:** | |
| ***Sooma bixin*** | |
| ***QAYBTA LABAAD*: XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOOYINKA MADAXWEYNAHA:** | |
| **1) MAGACAABID,** | **363** |

| | |
|---|---|
| XEER MADAXWEYNE No: 0257/082012 | |
| 2) XIL-KA QAADIS, | 364 |
| 3) MAGACAABID, | 365 |
| XEER MADAXWEYNE No: 0258/082012 | |
| 4) MAGACAABID, | 366 |
| XEER MADAXWEYNE No: 0259/082012 | |
| 5) MAGACAABID, | 367 |
| XEER MADAXWEYNE NO: 0260/082012 | |
| 6) Abuurid Maareeye Madax bannaan oo maamula TV-ga Qaranka JSL | 368 |
| XEER MADAXWEYNE NO: 0261/082012 | |
| 7) MAGACAABID, | 369 |
| XEER MADAXWEYNE NO: 0262/082012 | |
| 8) XIL-KA QAADIS, | 371 |
| 9) MAGACAABID, | 372 |
| XEER MADAXWEYNE No: 0263/082012 | |
| 10) Wareegto Madaxweyne N0: 0264/092012 | 373 |
| 11) MAGACAABID, | 374 |
| XEER MADAXWEYNE NO: 0266/092012 | |
| 12) XIL-KA QAADIS, | 377 |
| 13) MAGACAABID, | 378 |
| XEER MADAXWEYNE NO: 0267/092012 | 379 |

| | |
|---|---|
| 14) In laga dhigo Hay'addaha Korontada Berbera iyo Hargeysa Wakaalado hoostaga Wasaaradda Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Guriyeynta <br> <u>XEER MADAXWEYNE NO:</u> <br> <u>0269/092012</u> | 380 |
| ***QAYBTA SADEXAAD*:** <br> **DIGREETOOYINKA, WAREEGTOOYINKA, AMARADA & XEER NIDAAMIYAYAASHA WASIIRADA, IWM** | 381 |
| 15) Joojin Kalluumaysiga Maraakiibta Shisheeyaha | |
| **<u>QAYBTA AFRAAD:</u> AMARADA & GO'AANADA MAAMUL** <br> *Sooma bixin* | |
| ***QAYBTA SHANAAD*:** <br> **OGEYSIISYADA** | 384 |
| 15) Naaddo Xaraash Guri LM:-Q2-202, Cabirkiisu yahay 24x36 Mt, kuna yaala Degmadda M/Haybe Iskana leedahay Shirkadda Telcom | |


## QAYBTA LABAAD:

## XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOOYINKA MADAXWEYNAHA:

JSL/M/XERM/249-1282/082012 31/08/12

# XEER MADAXWEYNE No: 0257/082012

# Magacaabid

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad, Faqradiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Tixgeliyey: | Ahmiyadda weyn ee ay Wasaaraduhu u leeyihiin Dalka iyo Dhismaha Qaranka; |
| Markuu Ka Fiirsaday: | Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo; |
| Markuu ku Qancay: | In uu hanan karo xilkan loo magacaabay; |

<u>Wuxuu go'aansaday</u>

In Mudane, Cabdilaahi Maxamed Daahir (Cukuse), laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Warfaafinta iyo Wacyigalinta ee JSL.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JSL/M/XILQ/249/1-1280/082012 29/08/12

Ku: Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta -Hargeysa

Og: Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga -Hargeysa

Ujeedo: Xil-ka Qaadis

Mudane,

Waxa aan aad kuugu mahadinayaa mudadii aynu wada shaqaynaynay. Xilalka Qaranka ayay dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaa darteed, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta ee JSL.

Haddaba waxaan kaa rajaynayaa in aad si niyad sami ah ugu wareejiso xilka aad haysay si ku meel gaadh ah Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga, Mudane Axmed Xaaji Cali Cadami, inta aan cid u soo magacaabayo.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JSL/M/XERM/249-1283/082012 31/08/12

# XEER MADAXWEYNE No: 0258/082012

# Magacaabid

## **Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad, faqradiisa (2)aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, |
| Markuu Tixgeliyey: | Ahmiyadda wayn ee ay Wasaaraduhu u leeyihiin Dalka iyo Dhismaha Qaranka, |
| Markuu Arkay: | In baahi loo qabo buuxinta jagadan hoos ku xusan, |
| Markuu Ka Fiirsaday: | Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo, |
| Markuu ku Qancay: | In uu hanan karo xilka loo magacaabay, |

<u>Wuxuu go'aansaday</u>

In Mudane, Abiib Diiriye Nuur, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta iyo Wacyigelinta ee JSL.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
<u>Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland</u>

JSL/M//XERM/249-1285/082012 31/08/12

# XEER MADAXWEYNE No: 0259/082012

## Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad faqradiisa (3)aad ee Distoorka Qaranka, |
| Markuu Tixgeliyey: | Ahmiyadda ay La Taliyayaasha Madaxweynuhu u leeyihiin Dhismaha Qaranka, |
| Markuu Arkay: | In baahi loo qabo buuxinta jagadan hoos ku xusan, |
| Markuu Ka Fiirsaday: | Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo, |

Markuu ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay,

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Daa'uud Khayre Kaahin, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado
La-taliyaha Madaxweynaha ee Arrimaha Siyaasadda.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JSL/M/XERM/249-1284/082012 31/08/2012

# XEER MADAXWEYNE NO:

# 0260/082012

## Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, faqradiisa (3)aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

| | |
|---|---|
| Markuu Tixgeliyey: | Ahmiyadda wayn ee Af-hayeenka Madaxtooyadu u leeyahay Madaxtooyada Dalka. |
| Markuu Aqoonsaday: | Baahida loo qabo in la buuxiyo jagada Af-hayeenimo. |
| Markuu Arkay: | Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo. |
| Markuu ku Qancay: | Inuu hanan karo xilkaasi, |

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Axmed Saleebaan Dhuxul, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Afhayeenka Madaxtooyada Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh;

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JSL/M/XERM/249-1288/082012 31/08/2012

# XEER MADAXWEYNE NO:

# 0261/082012

## Abuurid Maareeye Madax bannaan oo maamula TV-ga Qaranka JSL

(Creation of an autonomous National TV Managing Directorate of Somaliland)

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu arkay; Qodobka 90aad ee Dastuurka Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland,

Markuu arkay; Baahida loo qabo in Dalku yeesho Telefishan Qaran oo madax bannaan,

Markuu arkay; Inay lagama maarmaan tahay abbuurrid maareeye u madax bannaan maamulka iyo maareynta hawlaha baahinta gudo iyo dibedba u soo bandhigida barnaamijyada horumarineed ee dhismaha Qaranka,

Markuu tixgeliyey; Tijaabadii iyo talooyinkii mas'uuliyiinta kala duwan

Markuu Tixgeliyey; Ahmiyada weyn ee abuurida Maareeyahani ugu fadhiyo danaha Qaranka,

## Wuxuu soo saaray Xeerkan

Qod. 1 aad Waxa la abuuray Maareeye madax bannaan oo maamula TV-ga Qaranka.

Qodob. 2aad Waa Maareeye siyaasad ahaan, kormeer ahaan, talo iyo tilmaan ahaan hoos imanaya Wasiirka Warfaafinta iyo Wacyigelinta, iyada oo warbixintana uu si joogta ah ula

socodsiinayo Wasiirka iyo cidii uu u xilsaarto Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta iyo Wacyigelinta (Line Ministry).

Qod. 3aad Wuxuu mas'uul ka yahay baahinta wararka, barnaamijyada Siyaasadeed, dhaqaale iyo bulsho ee qaran gudo iyo dibedba oo leh maqal iyo muuqaalba

Qod. 4aad Maareeyaha Telefishanku wuxuu yeelanayaa qaab-dhismeed u gaar ah.

Qod. 5aad Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa marka Madaxweynuhu saxeexo.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JSL/M/XERM/249-1286/082012 31/08/2012

# XEER MADAXWEYNE NO:

# 0262/082012

# Magacaabid

Maareeyaha Guud ee Telefishanka Qaranka ee Madaxa bannaan
(Managing Director of the Autonomous National TV of Somaliland)

# Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu arkay; Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland,

Markuu arkay; Baahida loo qabo in loo magacaabo Maareeyaha Telefishanka madaxa bannaan ee Qaranka Somaliland,

Markuu arkay; Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo,

Markuu tixgeliyey; Soo jeedimihii iyo talooyinkii mas'uuliyiin kala duwan.

## Wuxuu go'aamiyey

In Mudane, Khadar Cali Gaas, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Maareeyaha Telefishanka Qaranka madaxa bannaan ee Qaranka Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JSL/M/XILQ/249/1-1293/082012 31/08/12

Ku: Mudane, Xuseen Cumar Magan
Gudoomiyihii Hore ee Gobolka Gabiley -Gabiley

Og: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha -Hargeysa

Ujeedo: Xil-ka Qaadis

Mudane,

Waxaan kaaga mahad celinayaa mudadii aad u soo shaqaynaysay Qaranka, wakhtigan xaadirka ah waxa aan gartay in aan xilkii Gudoomiyaha Gobolka Gabiley u magacaabo masuul cusub oo xilkaasi guta.

Sidaa darteed, waxaan ku faraya in aad xilka ku wareejiso, Mudane, Axmed Cali Nuur oo aan u soo magacaabay in uu noqdo Gudoomiyaha Gobolka Gabiley.

Waxaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo ay warqadani ogaysiin ugu socoto la farayaa in uu labada masuul u kala wareejiyo xilka Gudoomiyaha Gobolka Gabiley.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JSL/M/XERM/249-1290/082012 31/08/12

# XEER MADAXWEYNE No: 0263/082012

# Magacaabid

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Gudoomiyayaasha Gobolladu u leeyihiin dhismaha Qaranka;

Markuu Aqoonsaday: In baahi loo qabo buuxinta jagada Gudoomiyaha Gobolka Gabiley;

Markuu La Tashaday: Madaxda ay hawshani khusayso;

Markuu ku Qancay: In uu buuxin karo, aqoon iyo kartina u leeyahay jagadan;

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Axmed Cali Nuur, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Gudoomiyaha Gobolka Gabiley ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JSL/M/WM/240-1307/092012 12/09/12

Ku: Dhammaan Wasaaraddaha JSL -Hargeysa

Ku: Dhammaan Hay'adaha Madaxa
Bannaan ee Dawlada -Hargeysa

Ku: Dhammaan Ciidamada
Jamhuuriyadda Somaliland -Hargeysa

Ku: Hay'adda Sirdoonka Qaranka -Hargeysa

Ku: Dhammaan Maamullada Gobollada
iyo Degmooyinka

Ku: Guddoomiyaha Guddiga Caddaaladda

Ku: Ururada aan Dawliga ahayn

Og: Hay'adda Shaqaalaha Dawlada -Hargeysa

## Wareegto Madaxweyne N0: 0264/092012

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland,

Markuu arkay: Qodobka 12 aad , faqradiisa 2 aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

| | |
|---|---|
| Markuu arkay: | Qodobka 14aad ee Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasadda Xeer Lr. 14/2011 |
| Markuu arkay: | Qodobka 12 aad , faqradiisa 5 aad ee Xeerka Dorashooyinka Golayaasha Deegaanka iyo Madaxtooyada, Xeer Lr.20/2001 |
| Markuu arkay; | Qodobka 30aad ee Xeerka Doorashooyinka Golayaasha Deegaanka iyo Madaxtooyada Xeer Lr. 20/2001 |
| Markuu Tixgeliyey: | Habsami-u-socodka Doorashooyinka, Hannaanka Dimuqraadiyadda iyo dhexdhexaadnimada. |

## Wuxuu soo Saaray

Wareegtadan Maamul oo ka reebaysa;

Ciidamada Jamhuuriyadda Somaliland, Ururada aan Dawliga ahayn, Shaqaalaha Dawladda, Xubnaha Ka tirsan Garsoorka, Xeer Ilaalinta, Guddida Diwaangelinta Ururada Siyaasadda iyo Ansixinta Xisbiyada Qaranka iyo Guddida Doorashooyinka Qaranka;

1) In ay ka mid noqdaan ama ku lug yeeshaan arrimaha Axsaabta/Ururada Siyaasadda, isla markaana u ololeeyaan, taageeraan ama ka soo horjeestaan Xisbi/Urur Siyaasadeed.

2) In dhammaan Mas'uuliyiinta Xukuumadda heer kasta oo ay leeyihiin ku ololeeyaan hantida Dawlada; sida, Lacagta Dawladda iyo Gaadiidka Dawladda.

3) In Boodhadhka iyo Waraaqaha Ololaha Doorashooyinka lagu dhejiyo Gaadiidka Dawladda, Masaajidada, Xafiisyada, Xarumaha Diblamaasiyiinta iyo Ururada Caalamiga ah.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JSL/M/XERM/249-1329/092012 23/09/10

# Xeer Madaxweyne No:

# 0266/092012

# Magacaabid

## **Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad faqradiisa (3)aad, Xarafka (kh) ee Distoorka Qaranka, |
| Markuu Tixgeliyey: | Ahmiyadda ay Agaasimayaasha guud u leeyihiin Dhismaha Qaranka, |
| Markuu Arkay: | In baahi loo qabo buuxinta jagadan hoos ku xusan. |
| Markuu La Tashaday: | Madaxda ay khusayso, |
| Markuu ku qancay: | Kartidiisa, Aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo, |

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Cabdisamad Cumar Maal, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha JSL.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland
JSL/M/XILQ/249-1331/092012 23/09/12

Ku: Mudane, Shariif Libaax Muuse -Hargeysa
Agaasimihii Guud ee Hore ee Wasaaradda

Hawlaha Guud, Guriyaynta iyo Gaadiidka

Og: Wasiirka Hawlaha Guud, Guriyaynta iyo Gaadiidka
-Hargeysa

Ujeedo: Xil-ka Qaadis

Mudane,

Waxa aan aad kuugu mahadinayaa mudadii aynu wada shaqaynaynay. Xilalka Qaranka ayay dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaa darteed, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Hawlaha Guud, Guriyeynta iyo Gaadiidka.

Haddaba, waxaan kaa rajaynayaa in aad si niyad sami ah ugu wareejiso xilka Mudane Xuseen Xaaji Axmed Yusuf oo aan xilkaas u soo magacaabay.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JSL/M/XERM/249-1330/092012 23/09/10

# Xeer Madaxweyne No: 0267/092012

# Magacaabid

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad faqradiisa (3)aad, Xarafka (kh) ee Distoorka Qaranka, |
| Markuu Tixgeliyey: | Ahmiyadda ay Agaasimayaasha guud u leeyihiin Dhismaha Qaranka, |
| Markuu Arkay: | In baahi loo qabo buuxinta jagadan hoos ku xusan. |
| Markuu La Tashaday: | Madaxda ay khusayso, |
| Markuu ku qancay: | Kartidiisa, Aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo, |

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Xuseen Xaaji Axmed Yusuf, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Hawlaha Guud, Guriyaynta iyo Gaadiidka JSL.

Allaa Mahad Leh,
Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JSL/M/XERM/249-1336/092012 26/09/2012

# XEER MADAXWEYNE NO: 0269/092012

In laga dhigo Hay'addaha Korontada Berbera iyo Hargeysa Wakaalado hoostaga Wasaaradda Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Guriyeynta

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu arkay; Qodobka 90aad fagradiisa 3aad, xarafka (kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland,

Markuu arkay; In baahi weyn loo qabo dardargelinta, maamulka iyo hawlaha horumarineed ee Hay'addaha Korontoda,

Markuu tixgeliyey; Talooyinkii mas'uuliyiinta kala duwan,

Markuu Tixgeliyey; Ahmiyadda weyn ee Hay'addaha korontadu ugu fadhiyaan dhismaha Qaranka,

Wuxuu soo saaray Xeerkan

Oo Hay'addaha korontada Berbera iyo Hargeysa hoosgeynaya Wasaaradda Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Guriyeynta; xisaabta/dakhliga wakaaladduhuna ay ku dhacaan qasnadda dawladda Dhexe, kharashkuna u soo noqdo si waafaqsan nidaamka xisaabaadka dawladda dhexe.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# *QAYBTA SADEXAAD*:

# DIGREETOOYINKA, WAREEGTOOYINKA, AMARADA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA WASIIRADA, IWM

| Jamhuuriyadda Somaliland<br>Wasaaradda Kalluumeysiga<br>Iyo Khayraadka Badda. | Republic of Somaliland<br>Ministry of Fisheries<br>and Marine Resources |
|---|---|

***Ref:*** WKKHB/ W-01 / 201 / 09/2012 ***Date:*** 27/09/2012

| | | |
|---|---|---|
| Ku: | Dhamaan Wakiiladda Maraakiibta Shisheeye ee Kalluumaysiga | -Goobahooda |
| Og: | Agaasimaha Guud ee W.Kall & Khayraadka Badda | -Hargeisa |
| Og: | Wasiirka Arrimaha Guddaha JSL | -Hargeisa |
| Og: | Wasiirka Maaliyadda | -Hargeisa |
| Og: | Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha JSL | -Hargeisa |
| Og: | Madaxweynaha Jamhuuriyadda S/Land | -Hargeisa |

Ujeedo: ***Joojin Kalluumaysiga Maraakiibta Shisheeyaha***

***Mudanayaaal,***

- ☞Ka dib markay cabashooyin soo noqnoqday nooga yimaadeen muwaadiniinta ku nool deegaanadda xeebaha Somaliland oo ku saabsan dhibaatada iyo burburka ay ku hayaan marakiibta shisheeyuhu khayraadka baddeena .

- ☞Ka dib markaanu muddo sannad ah u kuur gelaynay xaqiijinta wararka ku saabsan maraakiibta shisheeyaha ee ka kalluumaysta baddeena.

- ☞Markaanu ka bogannay warbiximaha ay noo soo diyaariyeen Kormeerayaasha iyo goob joogayaasha aanu saarnay maraakiibta oo noo xaqiijiyay si aan muran lahayn khasaaraha ay gaysteen maraakiibtaasi.

- ☞Markaanu aragnay in ay maraakiibtaasi ay jabiyeen sharciga Kalluumaysiga JSL iyo heshiiskii ka dhexeeyay Wasaaradda.

- ☞Markaanu la tashannay khubaro caalami ah oo ku xeel dheer kalluumaysiga.

- ☞Markaanu wada tashi ballaadhan Wasaarad ahaan ka yeelannay waxa ka qabashada arrintan anagoo ka duulayna waajibaaka Wasaaradda oo ay laf dhabar u yihiin illaalinta iyo maamulka khayraadka badda.

- ☞Markaanu tixgelinay talooyinka iyo tusaalaha madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland ee ku waajahan ilaalinta Khayraadka Dalka Badda iyo Beriga.

- ☞Markaan eegnay awood yarida ilaalineed ee Wasaaradda ee waqtigan dhinac shaqaale iyo dhinac qalab isla markaana aan

ku guulaysan waynay dadaalo kala duwan oo aanu waxa kaga qabanaynay ilaalinta maraakiibta sababo jira awgood.

☞ Markaanu eegnay dhaqalaha yar ee nooga soo galaya iyo khasaaraha badan ee ay gaadhsiinayaan deegaanka baddeena.

Waxaanu go'aaminaya laga bilaabo maanta oo taariikhdu tahay **27/09/2012,** in la joojiyay oo la mamnuucay Maraakiibta Ajnabiga ama Shisheeyaha ah ee ka Kalluumaysita xeebaha Somaliland inta amar dambe ka soo baxayo.

Sidaas darteed, waxa la farayaa dhammaan wakiiladda maraakiibta shisheeyaha inay fuliyaan amarkan gaadhsiiyaana maraakiibii ay wakiilka u yihiin.

Isla markaa Masuuliyiinta Hay'adaha Dawladda ee warqaddan ogaysiinta ku leh waxa laga codsanayaa inay waajibkooda ka gutaan fulinta amarkan.

*Allaa Mahad Leh.*

**Cabdilaahi Jaamac Cismaan (Geeljire)**

Wasaaradda Kall & Khayraadka Badda

# *QAYBTA SHANAAD*:

## OGEYSIISYADA

**JAMHUURIYADDA SOMAALILAND**
**MAXKAMADDA GOBOLKA HARGAYSA**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**
**REGIONAL COURT HARGEISA**

**MGH**

MGH/DFL/57/2012 Date: 10/09/2012

Ku: Idaacada Radio Hargeysa =Hargaysa=

Ku: Jaraa,idka Madaxa Banaan =Hargaysa=

*Og; Loofuliye;- 25 Qof oo ka mid ah Shaqaalaha Shirkadda Telcom =Hargaysa=*

*Og: Qareen U yahay;- Cumar Abiib Cumar =Hargaysa=*

*Og;-Lagufuliye:- Shirkadda Isgaadhsiinta ee Telcom =Hargaysa =*

*Ujeedo:-Naaddo Xaraash Guri LM:-Q2-202, Cabirkiisu yahay 24x36 Mt, kuna yaala Degmadda M/Haybe Iskana leedahay Shirkadda Telcom*

*Maxkamadda Gobolka Hargaysa :-*

Markay Aragtay :- Galka Dacwada fulinta ah ee sumadiisu tahay MGH/DFL/57/2011 ee ka dhexeeya dhinacyadda sare ku xusan kuna saabsan dacwad fulin.

Markay Aragtay:- Arjiga Codsiga ee ku taariikhaysan 09/03/2012 ee uu Maxkamadda u soo Gudbiyay Qareenka loo fuliyahu Qareen Cumar Abiib Cumar kagana codsanyo Maxkamadda in loo fuliyo Go'aanka Sumadiisu tahay WSHAB/3.00/80/12.

Markay Aragtay:- Digniinta Maxkamadda Gobolka Hargeysa ee Sumadeedu tahay MGH/DFL/57/2012 ee 21/03/2012, taasi oo loogu digayo in shirkadda Telcom in ay ku soo bixiso hantida loo sheeganayo.

Markay Aragtay :- Qaraarka Maxkamadda Gobolka Hargeysa ee sumadiisu tahay MGH/DFL/57/2012 EE ku taariikhaysan 15/07/2012, ujeedadiisuna tahay qaraar Ogaalashiyo Is-hortaag Fulineed islamarkaana muddo 3 Bilood gudahood ah oo ka bilaabanta 15/04/2012 kuna Eg 15/07/2012 ku soo bixiso Shirkada telcom 52,380$ qaatana Lacagta taala Maxkamadda ee dhan 2,760$.

Markay Aragtay :- Codsiga xayiraada Guriga LM Q2-202, si loo xaraasho kuna taariikhaysan 22/04/2012.

Markay Aragtay:- Amarka Xayiraada Guri No Q2-202 Cabirkiisuna yahay 24X36Mt.

Markay Aragtay:- Amarka Qiimaynta ee sumadiisu tahay MGH/DFL/57/2012, kuna taariikhaysan 18/07/2012 taasi oo ay Maxkamaddu ku amrayso wasaarada Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Guriyeynta inay soo qiimayso Gurigaa lambarkiisu sare ku qoran yahay si loo Xaraasho maadaama ay bixin waayeen Lacagtii loo sheeganayey Shirkada Telcom.

Markay Aragtay: Qiimaynta ka soo baxday Wasaarada Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Guriyeynta ee ku taariikhaysan 04/09/2012, kuna saxeexan yihiin labada injineer ee kala ah:-

1. Eng:-Ismaaciil Jaamac Diiriye
2. Rashiid Cali Ducaale, Gurigaas oo lagu soo qiimeeyey 131,339$ (Boqol Kaw iyo Sodan Kun iyo saddex boqol sagaal iyo sodon Doolar)

Markay Ogaatay:- In lacagta ay ku leeyihiin loo fuliyeyaashu shirkadda Telcom ay dhan tahay 52,380$ (Laba iyo Konton Kun iyo saddex boqol iyo Sideetan Doolar oo keli)

Markay Aragtay:- Dhamman Asbaabta Sare ku xusan iyo qodobada 350,406,429 XHM waxay MAxkamadu soo saartay Xaraashkan Hoos ku qoran:-

1. Maxkamadda Gobolka Hargaysa Waxay Xaraashaysaa Guriga Lambarkiisu yahay No Q2-202, Cabirkiisuna yahay 24X36Mt, kuna yaala Waaxda M/Haybe iskana leedahay shirkada Telcom.
2. Xaraashkana waxaa lagala soo xidhiidhayaa Maxkamadda Gobolka Hargaysa, Kaaliyaha Sare Maxkamadda Gobolka Hargaysa Magaciisu yahay Maxamed Maxamuud Xirsi Lambarkiisu yahay 4427361, amaba Kaaliye Sakariye Cismaan Xirsi Lambarkiisuna yahay 4702100 wixii kale ee Tafaasiil ah waxaad kala soo xidhiidhi doontaa Maxkamadda Gobolka Hargaysa.
3. Xaraashku waxa uu ka bilaabmayaa Maxkamadda Gobolka Hargaysa horteeda maalinta ay taariikhdu tahay 22/09/2012.

*Allaa Mahad leh.*

(Xuseen Maxamuud Fadal )
Garsooraha Maxkamadda Gobolka Hargaysa

Sakariye Cismaan Xirsi
Kaaliyaha Maxkamadda Gobolka Hargaysa